

Waxaa la gaaray waqtigi dugsiga la dooran lahaa

Waqti dhaw waxaa uu canuggaagu helayaa boos-soo-bandhigid ku aaddan fasalka dugsiga xannaanada iyo barbaarinta carruurta ee degmada. Marka aad heshid warbixintan waa ina aad haa ama maya dhahdaa booska ama aad canuggaaga dugsii kale u raadsataa.

Waa muhiim in aad soo jawaabtid si dugsigu u ogaado inta carruur ah ee fassalka cusub billaabaysa xilliga deyrta.

Sidan ayaad sameyneysaa

- Gal barta eskilstuna.se/skolval halkaas oo adeegyadeenna elekteroonigga ah ee loogu tala galay dugsii-doorashadu ay ku jiraan. Adeegga elekteroonigga ah ayaad haa ama maya ku leedahay booska ama aad dooraneysaa "raadi dugsii kale". Haddii aad maya tiraahdid canuggaagu ma billaabayo fasalka dugsiga xannaanada iyo barbaarinta carruurta
- Adigaaga raadsaday och boos ka helay dugsii xur ah waxaad geleysaa adeegga elekteroonigga ah, waxaadna dooraneysaa "raadi dugsii kale" waxaadna dooraneysaa qeybta dugsiyada ee dugsiga hoos-dhexe ee kale.
- Haddii aad dooneysid in canuggaagu uu boos ka helo guriga xilliga firaaqada waxaad taas dooran kartaa marka aad dugsii doorashada ku sameyneysid adeegga elekteroonigga ah.
- Haddii uu canuggaagu leeyahay laba waalid oo sharci ahaan mas'uul iskala ah waa in labaduba ay galaan oo ay doorashada sameeyaan.
- Ma adeegsan kartid miyaa adeegga elekteroonigga ah? E-mail u dir skolval@eskilstuna.se ama wac 016-710 10 00, badhan doorasho 2. Ka dibna dooro khiyaarka **dugsii-doorasho**. Waxaad xitaa toos ahaan Eskilstuna ugu soo baaqan kartaa Alva Myrdals gata 5.

Taariikhyo muhiim ah

- 1 Nufeembar–16 Diseembar: dugsii doorasho ku aaddan fasalka dugsiga xannaanada iyo barbaarinta carruurta till förskoleklass – sannad dugsiiyeedka 6
- Nufeembar–Diseembar: guri furan oo ku aaddan dugsiyada hoose-dhexe ee degmada. Barta eskilstuna.se/skolval ayaad ka heleysa xilliyada uu furanyahay guriga furan.
- Xilli dugsiiyeedka guga 2017: jawaab ku aaddan booska dugsiga

Waa maxay fasalka dugsiga xannaanada iyo barbaarinta carruurta?

Fasalka dugsiga xannaanada iyo barbaarinta carruurta waa qaab dugsii oo ah lacag la'aan iyo iskaa iyo haddii aad doontid halkaas oo canuggaaga boos loogu casuumayo dugsii ku yaalla agagaarka deegaankaaga. Ulajeeddada laga leeyahay fasalka dugsiga xannaanada iyo barbaarinta carruurta waa in lixjirrada loo diyaar gareeyo dugsii ay billaabayaan sannadka imaanaya.

Ku soo dhawaw dugsiyada hoose-dhexe ee degmada Eskilstuna!